

# Maxay tahay Deeqda Alfond?



Deeqda Alfond waa Deeq \$500 ah oo loogu talagalay in lagu maalgeliyo caruurga Maine dugsiga sare kaddib. Deeqdu waa heer sare ah oo lagu kaalmeeyo qoysaska in ay bilaabaan una diyaargaroobaan, bilawga nolosha ilmaha ee waxbarashada sare. Waa haddiyad uu ganacsade reer Maine ah iyo samafalle Harold Alfond ugu deeqay caruurga Maine.

**Yaa qaata Deeqda Alfond?** Laga bilaabo 2013, dhamaan caruurga ay dhallaan dadka daggan Maine waxaa la siyyaa \$500 oo ah Deeqda Alfond. Bilowgii 2022, Mu'asasada Deeqda Waxbarasho ee Alfond waxay ku maalgelisay in ka badan \$64 milyan in ka badan 128,000 oo carruurga Maine ah. Cunugaada ma ka mid yahay? Deeqda Alfond waxaa kaloo la heli karaa iyado aad u kooban laga bilaabo 2008-2012. Booqo [www.MyAlfondGrant.org](http://www.MyAlfondGrant.org) si aad in badan u ogaato.

## Sidee ayay u shaqeysaa?

- Mu'asasada Deeqaha Waxbarashada Alfond oo ah mid aan raadinin fa'iido waxay dhamaan caruurga xaqa u yeesha ee Maine u maalgelisaa \$500 oo ah Deeqda Alfond.
- Lacagta waxaa lagu shubaa xisaab ay leedahay Mu'asasada Deeqaha Waxbarashada Alfond. Bacdamaa Deeqda Alfond \$500 la maalgeliyo da' hore, waxay qaadataa ugu yaraan 18 sanno si ay u yeelato awood ay ku kobacdo.
- Deeqda Alfond waxaa loo isticmaali karaa waxbarashada kulliyadaha iyo jaamacadaha, kulliyadaha bulshada iyo dugsiyo badan oo laga bart shaqooyinka ama farsamada. Waxaa xattaa loo isticmaali karaa jiifka iyo cuntada, buugaagta iyo kombuyutarada.
- Marka qoysasku rabaan inay iyagu wax ku darsadaan, waxay u baahan doonaan inay furtaan akoontadooda. NextGen 529® waa qorshaha 529 ee Maine, kaas oo qoysas badani u isticmaalaan inay u kaydsadaan waxbarashada dugsiga sare kadib. Si aad wax badan u barato ama u furato akoonkaaga, booqo [NextGenforME.com](http://NextGenforME.com).

## Maxay samayn karaan waalidiinta?

Bogga internetka waxaa laga helaa MyAlfondGrant waxaa laga helaa macluumaad, talooyin iyo ilo loogu talagalay caruuurga iyo waalidiinta! Booqo boggena internetka, [www.MyAlfondGrant.org](http://www.MyAlfondGrant.org), si aad u:

- Hubso qiimaha Deeqda cunugaada - qiimaha wuu isbaddalaa muddo kaddib!
- Cusbooneysi macluumaadka lagaala xariiro
- Samaayo MyPlan si ilmahaaga looga caawiyo in uu guuleysto
- Nala qeybswo sheeko ku saabsan qoyskaada ama cunugaada
- Hel macluumaad aad ku kaalmeysid ilmahaaga dariiqa ay u marayaan mustaqbal iftiimaya

  Nagala soco Facebook iyo Inyostagram!  
Mu'asasada Deeqda waxbarasho ee Alfond maaha qaybiyaha la oggolaaday ee NextGen 529.

 myAlfondgrant

ASF waa urur 501(c)(3) aan faa'iido doon ahayn oo madax banaan oo aan xidhiidh la lahayn ama ku dhaqmin wax awood ah oo FAME ledahay. FAME ma aysan oggolaan ama ma ansixin isgaarsiinta ASF guud ahaan, ama agabkan gaar ahaan, mas'uulna kama aha waxa ay ka kooban yihiin ama waxa ku jira isgaarsiinta ASF. Samaynta akoon NextGen iyo ka qaybqaadashada qorshaha Maine ee 529 waa in lagu habeeyaa iyada oo loo marayo codsi toos ah oo loo gudbinaayo FAME. ASF kama haysato wax awood ah FAME si ay u sameyso wax soo jeedin ah, ama bixiso wax talobixin ama talo ah, oo ku saabsan ka qaybgalka barnaamijka NextGen. NextGen 529 waa qorshe Qaybta 529 ay maamusho Maamulka Maaliyadda ee Maine (FAME, Finance Authority of Maine). Wuxaad heli kartaa Sharaxaada Barnaamijka NextGen 529 adiga oo ka codsanaya nuqul xirfadlahaaga maaliyadeed, ama booqanaya NextGenforME.com ama ka wacaaya maareeyaha barnaamijka halkaan 1-833-336-4529. Sharaxaada Barnaamijku waxa uu ka kooban yahay macluumaad dheeri ah oo dhammaystiran, oo ay ku jiraan ujeedooyinka maalgashiga, kharashyada, kharashyada iyo khataraha la xidhiidha maalgashiga NextGen 529, oo ay tahay inaad si taxadar leh uga fiirsato ka hor intaanad maalgelin. Akoonnada NextGen 529 ma ahan dhigaalo bangi ceymisna kuma leh Shirkadda Caymiska Dhigaalka ee Federaalka (FDIC, Federal Deposit Insurance Corporation). Soo celinta maalgashiga ee NextGen 529 ma dammaanad qaadayaan ama caymis ma siinayaan Gobolka Maine, FAME ama adeeg bixiyayaasha NextGen 529.

Ka qaybgalayaasha NextGen 529aya duusha saarranaya dhammaan khatarta maalgashiga ee NextGen 529, oo ay ku jiraan luminta suurtagalka ah ee raasumaalka iyo mas'uuliyadda ganaaxyada canshuuraha kuwaas oo la qiimeyn karo marka la eego noocyada kala duwan ee lacagaha lagala baxay lacagiihi la maalgashaday NextGen 529. Iyadoo ASF ay aaminsan tahay in kaydsiga iyo maalgelinta loogu talagalay kulliyadda ay faa'iido u leedahay carruurta Maine, ASF waxay xustay in qiimaha maalgashiga qorshooyinka 529 ay hoos u dhici karaan sababo dhowr ah dartood, kuwas oy ku jiraan go'aamada maalgashiga hoose iyo/ama ficillada ama facil ka-tegidda bixiyeasha adeegyada. ASF waxay iska fogaynaysaa mas'uuliyadda soo celinta maalgelinta Deeqda Alford ee ilmaha ama wax kasta oo lagu darsado 529.